# Isbeddello lagu samaynaayo oggolaanshaha badbaadada caalamiga ah, laga bilaabo 2.1.2025

Muddada gggolaanshaha badbaadada caalamiga ah waa la soo gaabin doonaa, waxaana badbaadada caalamiga ah ay isu beddelaysaa mid kummeelgaar ah laga bilaabo 2.1.2025, marka isbeddellada lagu sameeyay sharciga ajaanibta ay dhaqangalaan.

Oggolaanshaha badbaadada caalamiga ah waxaa ay kala yihiin:

- magangalyada, taasoo ah mid oggolaanshaheeda lagu saleeyay heerka qaxootinnimada, iyo
- sharciga degganaanshaha dalka ee lagu saleeyay badbaadada heerka labaad.

## Sidee ayaa loo soo gaabinayaa muddada oggolaanshaha badbaadada caalamiga ah?

Sharciga degganaanshaha dalka ee ugu horreeya iyo kordhinta sharciga oggolaanshaha deggenaanshaha ee lagu saleeyay magangalayoddoonista qaxootinnimo iyo badbaadada heerka labaad, waxaa markii hore la oggolaan jiray muddo 4 sano ah.

Laga bilaabo 2.1.2025 waxaa oggolaanshaha loo bixin doonaa sida soo socta:

- Magangalyada waxaa la bixinayaa 3 sano.
- Kordhinta oggolaanshaha deggenaanshaha ee lagu saleeyay heerka qaxootinnimo waxaa la bixinayaa 3 sano.
- Sharciga degganaanshaha ugu horreeya ee lagu saleeyay badbaadada heerka labaad waxaa la bixinayaa hal sano.
- kordhinta sharciga oggolaanshaha deggenaanshaha ee lagu saleeyay badbaadada heerka labaad waxaa la bixinayaa 2 sano.

## Muddada ay shaqaynayaan sharciyada degganaanshaha ee haatan wax isbeddel ah kuma dhacaayo

Isbeddellada kor lagu soo sheegay waxaa ay khuseeyaan oo keliya sharciyada degganaanshaha badbadada caalamiga ah ee la bixiyay laga bilaabo 2.1.2025.

Haddii aad hadda haysato sharciga degganaanshaha dalka oo shaqaynaaya, kaasoo lagu saleeyay badbaadada caalamiga ah, waxba lagaagama baahna inaad samayso. Sharcigaaga deggannaanshaha dalka waxaa uu shaqaynaayaa illaa iyo inta laga gaaraayo wakhtiga kama dambaysta ah ee ku qoran kaarkaaga sharciga degganaanshaha dalka.

## Maxaa loola jeedaa kummeelgaarnimada sharciga badbaadada caalamiga ah?

Kummeelgaarnimada sharciga badbaadada caalamiga ah waxaa loola jeedaa, in Hoggaanka socdaalka uu haatan si ka badan sidii hore qiimayn ugu samaynaayo sharciga

badbaadada caalamiga ah ee sii soconaaya. Sharciyada degganaanshaha dalka ee lagu saleeyay badbaadada caalamiga ah ee la bixiyo, waxaa mustaqablka ay ahaan doonaan nooca oggolaanshaha ee loo yaqaan (A-lupa), oo loola jeedo oggolaanshaha A, laakiin ujeeddadu waa in macmiiilka la siiyo sharciga badbaadada caalamiga ah wakhtiga uu u baahan yahay oo keliya.

Baahida kordhinta sharciga badaabada waxaa saamayn ku yeelanaaya arrimahaan soo socda:

- xaaladda ammaanka ee dalkaagii waa ay isbeddeshay, kaddib markii lagu siiyay sharciga badbaadada caalamiga ah
- waxaad u safartay dalkaagii ama dalkii hore ee aad sida joogtada ah ugu noolayd
- waxaad qaadatay baasaboor uu bixiyay dalkaaga aad u dhalatay ama aad jinsiyaddiisa haysato.

## Dambiyadu waxay saamayn ka badan sidii hore ugu yeelanayaan siinta ama oggolaanshaha badbaadada caalamiga ah iyo kala noqoshadooda

Isbeddelka sharciga ayaa ku soo kordhin doona sababo cusub oo ku saabsan joojinta oggolaanshaha badbaadada caalamiga ah iyo kala noqoshadiisa. Waxaad arrinkaas ka akhrisaa boggeena internetka, (xaalado noocee ah ayaa lagu joojin karaa oggolaanshaha sharciga badbaadada caalamiga ah) missä tilanteissa kansainvälistä suojelua voidaan jättää myöntämättä.

Waxaad ka akhrisaa boggeena internetka arrinka ku saabsan xaladdee ayaa (Hoggaanka socdaalku uu ku joojin karaa sharciga lagu saleeyay heerka qaxootinnimo ama badbaadada heerka labaad) Maahanmuuttovirasto voi lakkauttaa pakolaisaseman tai toissijaisen suojeluaseman.

## Noocyada luqadaha